



Xuquuqdaada Fiktooriya gudaheeda iyo cidda ku caawin karta

Xuquuqda aadamaha

Fiktooriya gudaheeda sharciga way ka soo horjeedaa in qof ku takooro, takooridaas oo ku salaysan jinsiyada, diinta, sinjiga iyo siyaasiyan qofku wuxuu aaminsan yahay iyo waxyaalla kale oo badan. Waxaad kale oo leedahay xuquuqaha, sida xaqa inaad amaangasho, in si fiican laguula dhaqmo, inaad raacdo diintaada aadna ku raaxaysato dhaqankaaga iyo qoyskaaga.

Waxaan waxaa loogu yeeraa “ xuquuqda aadamiga” qof walbaana xuquuqdaas oo kale ayuu leeyahay Fiktooriya gudaheeda, meel kasta oo aad ku dhalatay.

Takoorid

Sidoo kale way ka soo horjeeda sharciga in laguula dhaqmo si ka duwan caadiga ama si aan haboonayn haddii ay ka dhacdo goobaha sida shaqada, dugsiga, dukaan ama makhaayad ama goobaha kubbada lagu cayaaro.

Dadku kuulama dhaqmi karaan si aan sharci ahayn sababa la xiriira:

- Midabkaaga, dhaqankaaga ama jinsiyadaada, meeshaad ka soo jeedo ama wadanka aad ka timid
- Diintaada, raacida diintaada ama xarakaadyada. Tusaale ahaan, dadku kuulama dhaqmi karaan si ka duwan sida caadiga ah sababtoo ah waxaad aadaa masaajidka, goobta caabudida Yuhuuda ama kaniisada. Sidoo kale dhib ma leh in aadan waxba aaminsanayn
- Inaad leedahay iin, jiro ama dhaawac. Tusaale ahaan, haddii aad leedahay iin ama jirro waxaad weydiisan kartaa shaqo kale adiga oo aan lagugu ciqaabin waana in qofka madaxda kuu ahi sameeya qorshe macquulla si aad hawshaada u qabato

- Ama ahaw waalid ama daryeelle. Tusaale ahaan, haddii aad daryeesho carruur waxaad weydiisan kartaa shaqo la jaan qaadi karta hawsha guriga si aad u daryeesho carruurta ama xubna ka tirsan qoyska
- Da'daada. Tusaale ahaan, haddii aad shaqo dalbato kuma oran karaan waad weyn tahay ama aad ayaad uga yar tahay shaqada
- Ama ahaw nin ama dumar
- Uur leedahay ama naas nuujinayso. Tusaale ahaan, waa ookay inaad ku naas nuujiso ilmahaaga goob dadweyne sida goobaha kafeega ama goobaha cayaaraha, waxaadna dooran kartaa inaad shaqayso markaad uur leedahay ama naas nuujinayso
- Isu galmood waa Ookay sharciga. Tusaale ahaan, laguulama dhaqmi karo si aan haboonayn qofka galmoodka wada samayseen dartiis
- Galmoodka aad ka hesho ama aqoonsiga la xiriir sinjiga. Tusaale ahaan, khaniis, khaniisad, kuwa labadaba ah, kuwa midkood iska dhegay, galmood la bedelay, wax aan caadi ahayn, iyo kuwa toosan dhamaan waxay leeyihiin xuquuq isku mid ah
- Ama xaas ahaw ama ha ahaan. Macna ma samaynayso haddii aad xaas leedahay, lagu furay ama aad qof wada nooshihiin, weli waa in isku si laguula dhaqmaa
- Sidaad u muuqato. Tusaale ahaan, laguulama dhaqmi karo si aan haboonayn sabab la xiriirta dhererka, miisaanka, timaha ama calaamadaha lagu dhasho
- Ficiladaada ku saabsan xuquuqdaada shaqada. Tusaale ahaan, shaqada lagaama saari karo ama ciqaabi karo haddii aad su'aalla keento ama ka hadasho dhibta aad ku qabto shaqadaada

- Xarakaadka ururka shaqada. Tusaale ahaan, shaqada lagaama saari karo xubin aad ka tahay ururka shaqaalaha ama aadida mudaaharaadka daraadeed
- Siyaasadaada, waxaad ka aaminsan tahay siyaasada ama xarakaadka ama in aadan ka qaybgelin hawla siyaasadeed

Waxay kaloo ka soo horjeedaa sharciga inaad ula dhaqanto qof kale sababahaan mid ka mid ah dartood.

Haddii aad doonayso macluumaad intaas ka badan oo xuquuqdaada aadamiga ama wixii ku saabsan takoorida iyo wixii aad samayn karto haddii aad u baahan tahay caawimo, waxaad wici kartaa Guddiga tel: **1300 292 153** ama turjubaan, fadlan wac **1300 152 494**.

Laguguma ciqaabi karo ama si aan haboonayn laguulama dhaqmi karo inaad na weydiisato kaalmo darteed ama samaynta dacwad, waxaana arrinta ogaanaya dadka dacwada ku lug leh keliya. In aad xerayso dacwad macneheedu maaha inaad maxkamada tagto.

Waxaad kaloo booqan kartaa **humanrightscommission.vic.gov.au** macluumaad intaas ka badan. Waxaanu kaloo bixin karaa macluumaad ku saabsan xuquuqdaada goobaha dadweynaha, shaqada iyo ururada xukuumada dadweynaha.



**Victorian Equal Opportunity
& Human Rights Commission**

Need more information?

Contact the Commission:

Enquiry Line 1300 292 153 or (03) 9032 3583
 Fax 1300 891 858
 TTY 1300 289 621
 Email enquiries@veohrc.vic.gov.au
 Website humanrightscommission.vic.gov.au

Accessible formats

This publication is available to download from our website at humanrightscommission.vic.gov.au/resources in PDF and RTF. Please contact the Commission if you require other accessible formats.

We welcome your feedback!

Were these resources useful? Easy to use? Would you like to see something else included? Please email us at communications@veohrc.vic.gov.au.

Published by the Victorian Equal Opportunity and Human Rights Commission, Level 3, 204 Lygon Street, Carlton Victoria 3053. May 2013.

Disclaimer: This information is intended as a guide only. It is not a substitute for legal advice.